

Waayeelka Alberta ayaa hada xaq u leh tallaalka KOOFID-19

Fabraayo 19, 2021

Dowlada Alberta waxay bilaabi doontaa inay siiso tallaalka KOOFID-19 dhamaan dadka waayeelka ah ee jira 75 sano iyo wixii kabadan ee gobolka.

Laga bilaabo Febraayo 19, Adeegyada Caafimaadka ee Alberta (Alberta Health Services) waxay si toos ah tallaalka ugu fidin doonaan dhammaan dadka deggan xarumaha dadka waayeelka ee hawlgabka ah, hoteelada, taageerida nolosha iyo goobaha kale ee la isugu yimaado ee ay la leeyihiin dadka deegaanka ah ee 75 sano jirka ah ama ka weyn.

Laga bilaabo Febraayo 24, qof kasta oo reer Alberta ah oo ku dhex nool bulshada oo dhashay 1946 ama wixii ka horreeyey wuxuu xaq u yeelan doonaa inuu qabsado ballanta tallaalka KOOFID-19. Helitaanka ballanta waxay ku salaysnaan doontaa bixinta tallaalka.

Madax bannaanida iyo bulshada waayeelka

Qof kasta oo dhashay 1946 ama ka hor ayaa awoodi doona inuu helo tallaalka, iyadoon loo eegin meesha uu ku nool yahay. Dadka waayeelka ah waxay awood u yeelan doonaan inay qabsadaan ballantooda tallaalka iyagoo adeegsanaya Adeegyada Caafimaadka ee Alberta iyo nidaamka ballansashada khadka tooska ah iyo taleefoonka.

Faahfaahinta ku saabsan sida loogu qabsado ballanta dhanka taleefanka ama khadka tooska ah waxaa la sii deyn doonaa Febraayo 24, iyo xiriiriyayaasha ayaa lagu dhejin doonaa bogga tallaalka KOOFID-19 ([COVID-19 vaccine web page](#)). Xogta ku saabsan caawinta waayeelka go'doonka ku jira iyo kuwa caqabadaha dhaqdhaqaaqa leh ayaa sidoo kale la soo dhejin doonaa.

Waayeelka ku nool goobaha isku imaatinka

Adeegyada Caafimaadka ee Alberta waxay si toos ah ugu fidin doontaa tallaalka dhammaan dadka deggan xarumaha dadka waayeelka hawlgabka ah, hoteelada, taageeridda nolosha iyo goobaha kale ee la isugu yimaado ee dadka deegaanka deggan ee jira 75 ama ka weyn. Saraakiisha caafimaadka ayaa la xiriiri doona dadka waayeelka ah si ay isugu soo uruuriyaan xarumaha daryeelka si ay ugu qabtaan ballamaha adeegyada tallaalka.

Goobaha ay waayeelka xaq u leh inay la dhexgalaan deganayaasha ka yar da'da 75, saraakiisha caafimaadka ayaa tallaalka siin doona qof kasta oo ku nool xarunta. U fidinta tallaalka KOOFID-19 isku mar dhammaan dadka deegaanka waxay yareyneysaa halista guud ee isu gudbinta cudurka, jirrooyinka daran iyo dhimashada kuwa ugu nugul.

Dadka reer Alberta ee u qalma

Waayeelka da'doodu tahay 75 iyo wixii ka weyn waxay ku biiri doonaan liiska sii kordhaya ee reer Alberta ee u qalma inay helaan tallaalka KOOFID-19, oo ay ku jiraan:

- Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee qaybaha KOOFID-19, qaybaha caafimaadka iyo qalliinka, iyo qolalka qalliinka.
- Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee waaxaha gurmada.
- Shaqaalaha daryeelka guriga.

- Deganayaasha iyo shaqaalaha daryeelka muddada dheer iyo goobaha taageerada oo loogu talagalay.
- Daaweeyayaasha neefsiga.
- Shaqaalaha iyo farsamayaqaannada caafimaadka degdegga ah.
- Ummaddihii ugu Horreeyay (First Nations), Métis iyo dadka jira 65 sano iyo wixii ka weyn ee ku nool bulshada kasoo jeeda Dadkii Hore ama deegaanka dadka Metis ah.

Dhameystirka qiyaasaha labaad ee daryeelka muddada dheer iyo goobaha taageerida ee loogu talagalay

- Dadka ku nool goobaha Adeegyada Caafimaadka Alberta ee qandaraaska ku qaatay daryeelka muddada dheer iyo taageerida loo qoondeeyey ee Alberta ayaa hadda si buuxda looga tallaalay KOOFID-19.
- 29,233 qof oo ku nool daafaha gobolka ayaa hadda helay laba qiyaas oo tallaah ah. Tani waxay matalaysaa dhammaan dadka deggan xarumahaan ee u qalma, marka laga reebo kuwa aadka u jiran ama haddii kale aan heli karin labada qiyaasood.

Dawladda Alberta waxay ka jawaabaysaa faafida KOOFID-19 iyada oo ilaalinaysa nololaha iyo habnololeedka oo tilaabooyin sax ah loo marayo, joogtaynta ganacsiyada yaryar iyo ilaalinta nidaamka daryeelka caafimaadka ee Alberta.

Xogta la xiriirta

- Barnaamijka tallaalka KOOFID-19 ([COVID-19 vaccine program](#))

Weydiimaha warbaahinta

[Jerrica Goodwin](#)

587-988-3278

Xoghayaha Saxaafadda, Xafiiska Gudoomiyaha

[Tom McMillan](#)

780-422-4905

Kaaliyaha Agaasimaha Isgaarsiinta, Caafimaadka

Si aad u hesho ilaha ay Dowladdu tarjuntay, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>.